

GUUDMAR

# SOOMAALIYA
## DIB-U-EEGISTA MAGAALEYNTA

Kordhinta Magaalooyinka sidii Barroosinka Horumarinta

THE WORLD BANK
IBRD • IDA | WORLD BANK GROUP

© 2020 International Bank for Reconstruction and Development / The World Bank
1818 H Street NW
Washington DC 20433
Telephone: 202-473-1000
Internet: www.worldbank.org

This work is a product of the staff of The World Bank with external contributions. The findings, interpretations, and conclusions expressed in this work do not necessarily reflect the views of The World Bank, its Board of Executive Directors, or the governments they represent.

The World Bank does not guarantee the accuracy of the data included in this work. The boundaries, colors, denominations, and other information shown on any map in this work do not imply any judgment on the part of The World Bank concerning the legal status of any territory or the endorsement or acceptance of such boundaries.

Rights and Permissions

WORLD BANK GROUP

THE MULTI-PARTNER FUND

Foreign, Commonwealth & Development Office

The material in this work is subject to copyright. Because The World Bank encourages dissemination of its knowledge, this work may be reproduced, in whole or in part, for noncommercial purposes as long as full attribution to this work is given.

Any queries on rights and licenses, including subsidiary rights, should be addressed to World Bank Publications, The World Bank Group, 1818 H Street NW, Washington, DC 20433, USA; fax: 202-522-2625; e-mail: pubrights@worldbank.org.



# HORDHAC

**Muddo soddon sano ah, magaalooyinka Soomaaliya waxay noqdeen barroosinno horumarineed.Haddii si wanaagsan loo maareeyo, magaalayntu waxay fure u tahay gacan siinta Soomaaliya inay horumar deg deg ah oo fog yeelato.** In kastoo heerka kororka magaalooyinka ee sare ee Soomaaliya uu la imaan karo caqabado, haddana magaalooyinka sida xowliga ah u koraya waxay horseed u noqon karaan kobaca dhaqaalaha, hal-abuurnimada, iyo adeeg-bixin horumarsan. Caddayntu waxay muujineysaa in dakhliga uu kordho markii saamiga dadka ku nool magaalooyinka uu sii kordhayo: Celcelis ahaan, boqolkiiba 1 kasta oo koror ku yimaada magaalaynta, GDPga qofkiiba wuxuu korayaa 4 boqolkiiba. Magaalooyinka waxay soo saaraan in kabadan 80 boqolkiiba GDP-ga adduunka oo dhan. Cufnaanta waxay kor u qaadeysaa wax soo saarka waxayna siineysaa fursado dadka si loo wanaajiyo hab nololeedka dadka deggan magaalooyinka iyo tayada nolosha, ugu dambeyntiina gacan ka geysata in dad badan laga saaro saboolnimada.

**Dhinaca kale, haddii si liidata loo maareeyo - haddii Soomaaliya ay ku guuldareysato inay daboosho baahiyaha dadka magaalooyinka ku sii kordhaya - guulaha yar ee Soomaaliya iyo xasilloonida ballaaran ayaa wiiqmi doona.** Hadba sida ugu dhakhsaha badan ee magaalooyinka Soomaalidu u koraan, marba marka ka dambaysa waxaa sii badan doona ka maqnaanshaha qorshe ku filan iyo sinnaan la'aan, maamul la isku haysto ayaa xannibaysa horumarka iyo kobaca dhaqaale ee magaalooyinkaasi abuuri karaan. Koror horumarineed oo aan qorshaysnayn waxay sababtaa fiditaanka xaafadaha isku-raranta iyo xaalufka deegaanka. Waxay kaloo kordhisaa tartanka ku aadan boosaska dhulka iyo kharashaadka bixinta agabka guud ee aasaasiga ah ee dadweynaha sida waddooyinka, biyaha iyo nidaamyada bullaacadaha, iyo helitaanka shabakadda korantada. Magaalooyinka Soomaalida, qaababka dejinta ayaa sida caadiga ah aad u kala sooca qabaa'ilka. Laakiin marka la eego in magaalooyinku ay wajahayaan mowjado waaweyn oo dad qasab lagu soo barakiciyay iyo muhaajiriin kale oo reer miyi ah oo magaalooyinka soo galay, kuwa dhaq-dhaqaaqa iyo is-dhexgalka qabaa'ilka dhexdooda ah waxay halis ugu jiraan inay xasilooni darro ka dhacdo. Xuquuqda dadka gudaha ku barakacay (IDPs) waa la isku haystaa oo deegaannadooda inta badan waa laga gooyaa adeegyada aasaasiga ah. Kooxaha saboolka ah iyo kuwa la takooro, guud ahaan, inta badan waa laga reebay helitaanka dhulka iyo adeegyada aasaasiga ah. Muranka hantida ee ka jira xaafadaha halka hantida maguurtada ahi tahay mid qiimo leh oo badeecad gabaabsi ah ay tahay isha ugu weyn ee rabshadaha iyo xiisadda bulshada. Si kasta oo ay rajo wanaagsan u tahay magaalooyinka Soomaaliya guulahooda dhaqaale, halista joogtada ah ee rabshadaha siyaasadeed ee la beegsanayo, isku dhacyada bulshada, iyo weerarada argagixisada ayaa ka dhigaya kuwo nugul. Magaalooyinka Soomaaliya ee Muqdisho, Merka, iyo Kismaayo ayaa dhowaan lagu qiimeeyay saddexda magaalo ee adduunka ugu jilicsan.

**Marka la eego doorka dhexe ee magaalooyinku ku leeyihiin horumarka iyo xasilloonida Soomaaliya, maareynta magaalaynta Soomaaliya waa mid muhiim ah. Haddana murugsanaanta siyaasadeed iyo maamul ee ka jirta Soomaaliya waxay ka dhigan tahay in hababkii caadiga ahaa ee wax looga qabanayay magaalaynta ay u badan tahay inaysan shaqeyn doonin.** Maareynta magaalooyinka waxaa lagu xayiray iskudhafan xoog leh oo ku saabsan xogta tirada dadka aan ku filneyn qaran ahaan; kala caddeyn la'aanta xuduudaha magaalada; lagu muransan yahay, oo aan caddayn, iyo awoodaha is-dulsaaran ee magaalooyinka u dhexeeya federaalka, gobolka, iyo maamulka degmada; la'aanta kaalin rasmi ah oo sharciyeed iyo awood ku filan iyo ilo dhaqaale oo loogu talagalay badhasaabada iyo dawladaha hoose gaar ahaan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya; nidaam badan oo la isku haysto, oo lagu muransan yahay, oo isku dhacyo salka ku haya oo loogu talagalay bixinta hantida, iibinta, iyo maaraynta khilaafaadka; iyo, sida hoos ku xusan, jiritaanka jilayaal badan oo aan dawli ahayn oo sheeganaya awood siyaasadeed ama adeeg

**Xarumaha magaalooyinka Soomaaliya waxaa xukuma iskudhafyo kaladuwan oo isugu jira mas'uuliyiin dawladeed iyo kuwa aan dawli ahayn, jawi siyaasadeed oo lagu tilmaamay "maamul isku dhafan":** In kasta oo ay joogaan howlwadeeno badan oo dowladeed - dowladda federaalka, dowlad goboleedka xubinta ka ah federaalka, iyo maamulka degmada - in badan oo ka mid ah awoodda rasmiga ah waxay ku jiraan gacanta odayaasha dhaqanka, hoggaamiyeyaasha ganacsatada, hoggaamiyeyaasha maleeshiyooyinka, kooxaha bulshada, iyo mas'uuliyiinta culimaa'udiinka. Howlwadeenayaashan aan dawliga ahayn waxay had iyo jeer ahaayeen il muhiim ah oo laga helo awood siyaasadeed sanadihii kahoreeyay dagaalkii sokeeye, laakiin doorarkooda ayaa si aad ah usii balaartay waxaana lagu tijaabiyay mudadii dheerayd ee dagaalada iyo burburki dawladeed ee Soomaaliya, markay noqdeen isha kaliya ee maamulka ka jiray dalka gudihiisa. Xiriirrada ay ayagu



isla leeyihiin ayaa aad u ballaaran, laga bilaabo iskaashiga joogtada ah iyo wadaagga awoodda sidoo kale xafiiltanka. Markii maamulkan lagu muujiyo doorka garsoor ee aan caadiga ahayn ee ku lug leh xukunnada dambiyada ama khilaafaadka, waxay ka tarjumaysaa nooc ka mid ah sharci wadareed taasoo dadyowga deegaanka ay u dooran karaan sharci madani, mid dhaqameed, ama mid diineed, ama isku-dar ka badan hal. Nidaamyadan maamul ee isku dhafan ayaa ah kuwo dareera oo isbedbeddela marka la eego sharcinimadooda iyo awooddooda maxalliga ah. Marka laga reebo qayb ahaan al-Shabaab, oo ku soo rogi karta go'aannadeeda xoog, inta badan hannaanka maamul ee aan rasmiga ahayn ee Soomaaliya waxay ku tiirsan yihiin gorgortanka.

**Si fudud haddii loo dhigo, Soomaaliya weli ma gaarin heer ay siyaasadaha iyo barnaamijyada horumarinta magaalooyinka ee caadiga ahi wax ku ool noqon karaan -** Waddanku wuxuu u baahan yahay inuu kordhiyo waxtarka wanaagsan ee magaalooyinkiisu ka geysan karaan guud ahaan horumarka, shaqaaleynta, nabadda, iyo dowlad-wanaagga, laakiin xilligan waxaa ka maqan hay'adaha maxalliga ah ee wax-ku-oolka ah, la awood-siiyey, iyo kuwa la maal-geliyay si ay u bixiyaan qaab-dhismeedka maamul ee looga baahan yahay isla markaana si toos ah u bixiyaan adeegyo. Magaalooyinka Soomaaliya waxay leeyihiin hoggaan ay ka go'an tahay - magaalooyinka waaweyn iyo kuwa yaryarba waxay soo jiiteen qaar ka mid ah hoggaamiyeyaasha dadaalka iyo waxtarka leh 25-kii sano ee la soo dhaafay. Laakiin hogaamiyaashaas waxay haysteen agab yar oo ay ku shaqeeyaan waxayna la kulmeen iska caabin dhinacyo badan ah.

**Istaraatiijiyada kala-guurka ah oo loogu talagalay howlgelinta iyo xoojinta maamulka magaalooyinka iyo adeeg bixinta ayaa loo baahan yahay lagana leexan Karin:** Dadaallada socda ee lagu xoojinayo dowladda hoose iyo qeexidda awoodda siyaasadeed oo ka hergasha Somaaliya waa in lagu mataaneeyo istiraatiijiyad wax ku ool ah oo looga gol leeyahay in lala kaashado awoodaha maxalliga ah si loo gaarsiiyo maamul iyo adeegyo aad loogu baahan yahay dadka magaalooyinka ku nool. Qaabka noocan oo kale ah uma badna inuu dhaliyo "culeys dhicis ah," taas oo hay'adaha dowladda Soomaaliya looga dhigayo inay dusha u ritaan, si dhakhso leh. La shaqeynta waxa jira waxay u baahan tahay isbeddel maskaxeed:



wada-hawlgalayaasha iskaashiga ah (gaar ahaan kuwa leh iskaashi horumarineed) waxay u baahan yihiin inay diyaar u noqdaan qabashada xalal isku-dhafan, “sifiican ugufiican”, iskaashi lala yeesho kuwa howlwadeenada dowliga iyo kuwa aan dowliga ahaynba hadba sidii loogu baahdo. Dhinaca dowladda, tan macnaheedu waa ogolaansho, ugu yaraan istiraatiijiyad kumeelgaar ah ahaan, fikradda ah “Adeege saddexaad oo adeeg bixineed”, oo ku badan dalal badan sida Mareykanka, oo ay dowladda la-hawlgalaan ama ay gacan ka siiyaan bixinta adeegyada muhiimka u ah ganacsiga gaarka loo leeyahay. Habkani wuxuu u baahan yahay dhammaan daneeyayaasha inay isu yimaadaan oo ay ku heshiiyaan xeerarka rasmiga ah, qawaaniinta, iyo qaababka isla xisaabtanka ee hoosta ka xariiqaya qaababka uu adeege sadexaad dowlada gacan ka siiyo bixinta adeega.

**Ujeeddada maaraynta magaalaynta Soomaaliya waa inay noqotaa mid si kordheysa u dhalisa sharciyo fara badan oo isugu jiro rasmi iyo kuwo aan rasmi ahayn iyo nidaamyo ku xeeran maamulka iyo gaarsiinta adeegga ayadoo ay jirto xaalad wada-jir, iswaafajin, kalsooni, iyo karti”** Wadajirka” waxaa loola jeedaa in nidaamyada iyo hay’adaha iskhilaafsan ay ka soo ifbaxayaan ka soo horjeedka midba midka kale oo ay u gudbaan heer ay kaashanayaan, oo ay sidaa darteed si ballaadhan ugu wada socdaan hal jaho, oo leh halbeegyo isku mid ah, halkii ay midba midka kale wiiqi lahaayeen. Sababtoo ah ma jirto hal hay’ad oo wax ka qaban karta maamulka ballaaran ee magaalooyinka iyo caqabadaha bixinta adeegga, “Is-dhammaystirka” waxay u baahan tahay nidaamyo rasmi ah iyo kuwo aan rasmi ahayn si loo helo waddo aan ku koobnayn oo keliya wada noolaanshaha laakiin sidoo kale gacan ka geysanaya buuxinta midba midka kale dulduleeladiisa, iyadoo ka faa’iideysaneysa faa’iidooyinka isbarbardhigga ah. “Kalsoonida” ayaa xoojineysa in geeddi socodka iyo natiijooyinka dadaallada noocaas ah ay u baahan yihiin in loo arko inay sharci yihiin dhamaan si loo xaqiijiyo helitaanka taageerada siyaasadeed. Waxaa si gaar ah muhiim u ah in la hubiyo aqbalaada dowlada iyo taageeradeedamarkasta oo lala kaashanayo howl wadeenada “isku-dhafan” howl wadeenada maamulka ee bixinta adeegga. Ugu dambeyntiina, “kartida” waxay u baahan doontaa in laga xoojiyo howl wadeenada rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahaynba si loogu ugu suurtagasho inay ciyaaraan doorro aad u adag oo ballaadhan.

# UJEEDDADA DIB-U-EEGISTA MAGAALEYNTA SOOMAALIYA

**Dib-u-eegista Magaaleynta Soomaaliya ayaa looga gol leeyahay in lagu hanto caqabadaha la xiriira magaalaynta Soomaaliya iyo in la aqoonsado waxqabadyada muhiimka ah ee gacan ka geysan kara sidii si wanaagsan loomaareyn lahaa.** Dowladda iyo la-hawlgalayaasha horumarinta labaduba waxay si ballaadhan isugu waafaqeen muhiimadda xasaasiga ah ee magaalayntu u leedahay horumarka Soomaaliya. Haddana, waxaa jiray falanqeyn yar oo dhammaystiran oo saldhig u ah istiraatiijiyad-horumarineed magaalo oo isku xiran. Dib-u-eegista Magaaleynta waxay wax ka soo qaadatay falanqeyn xagga farsamada iyo dhaqaalaha ah si loo helo faham wanaagsan oo ku saabsan arrimo fara badan oo ku aaddan arrimaha magaalooyinka Soomaaliya. Warbixinta ayaa looga dan leeyahay in la fududeeyo wadahadal xog-ogaal ah oo u dhexeeya dowladda, shirkadaha gaarka loo leeyahay, bulshada rayidka ah, la-hawlgalayaasha horumarinta iyo daneeyayaasha kale ee ku saabsan istiraatiijiyad horumarineed oo ballaaran oo ka jirta Soomaaliya. Waxay sidoo kale ujeedkeedu yahay in lagu biiriyo Bangiga Adduunka mashaariicdiisa mustaqbalka ee magaalooyinka iyadoo la ogaanayo meelaha mudnaanta leh ee wax qabadka




# MAGAALEYNTA SOOMAALIYA

**Soomaaliya si xawli ah ayey u magaaleysmaysaa.** Qiyaasta kororka dadka ee magaalooyinka waa mid aad u sarreysa - qiyaastii 4.3 boqolkiiba sanadkiiba, oo la mid ah heerarka Bariga Afrika laakiin ka sarreeya celceliska qaaradda ee 4 boqolkiiba. Laakiin Soomaaliya xilligan waa ka magaaleyn wanaagsan tahay dalalka deriska la ah. In kasta oo tiro dadweyne la isku halleyn karo ayna jirin, haddana Soomaaliya waxaa ku nool dad lagu qiyaasay 15.9 milyan, kuwaas oo 7.4 milyan ama 46 boqolkiiba ay yihiin dadka deggan magaalooyinka, marka la barbar dhigo qiyaastii 28 boqolkiiba dalka deriska Kenya. Saadaashu waxay muujineysaa in sanadka 2030-ka, Soomaaliya ay ku dari doonto 3.8 milyan oo kale oo ku nool magaalooyinkeeda, iyo 11.6 milyan oo kale marka la gaaro sanadka 2050-ka, taasoo saddex laabeysa dadka magaalooyinkeeda ku nool mudo 30 sano ah.

**Inta badan koritaanka magaalooyinka ilaa maanta waxaa sii huriyay socdaalka miyiga iyo magaalooyinka.** Abaaraha, saboolnimada, iyo nabadgelyo darrida ayaa horseeday haajiritaankan, laakiin arrimo jiidaya ayaa iyaguna muhiim ah - in badan oo ka mid ah soogalootiga reer miyiga ah waxaa soo jiitay rajada ah inay helaan adeegyo iyo shaqooyin wanaagsan. Saadaashaani waxay runti dhayalsan kartaa kororka dadka magaalooyinka, iyadoo naxdintii ugu dambeysay ay ku riixday dadka reer miyiga ah ee Soomaaliyeed inay gabaad ka raadsadaan magaalooyinka. Waxaa lagu qiyaasaa in badankood 2.6 milyankan ee barokacayaalka ah ay ku nool yihiin magaalooyin. Ku dhowaad dhammaan boqollaal kun oo Soomaali ah oo ka soo laabtay xeryaha qaxootiga ee dalalka deriska ah ayaa sidoo kale degay magaalooyinka. Iyadoo la tixgelinayo in degsiimooyinkani ay inta badan ku yaalliin magaalooyinka, tani waxay soo jeedinaysaa in boqoleyda dhabta ah ee Soomaalida ku nool magaalooyinka ay ku dhowdahay boqolkiiba 54, halkii laga filayay tirada la saadaaliyay oo ah 46 boqolkiiba (Jaantus 1). Soomaaliya, oo mar ahaan jirtay bulsho gebi ahaanba miyi ah, waxaay ku beddelmaysaa heerkan aan caadiga ahayn ee magaalaynta deg-degga ah. Korodhka baaxadda leh ee dadka magaalooyinka Soomaalida soddonka sano ee soo socda waxay haysaa ballanqaad ah baahi ballaaran oo loo qabo badeecada iyo adeegyada gudaha.

Jaantus 1. Soomaaliya ayaa deg deg u magaaleysmaysa





Xigasho: WUP 2018 and SHFS 2017.

**Magaalooyinka Soomaaliya si weyn ayey u korayaan maxaa yeelay dadka ayaa lagu qasbayaa** Soomaaliya gudaheeda, waxaa jira xog aad u yar oo lagu qiyaaso kororka dadka ee dabiiciga ah ee magaalooyinka (in kastoo ay la mid noqon karto heerka kororka dadweynaha ee 2.8 boqolkiiba). Si kastaba ha noqotee, waxaa jira cadeymo muujinaya baaxad weyn oo reer miyi-magaalo yimid ah oo qasab lagu soo barakaciyey iyo tahriib. Tusaale ahaan, ku dhowaad 75 boqolkiiba barokacayaasha 2.6 milyanka ah ee Soomaaliya ayaa loo maleynayaa inay ku noolyihiin xarumaha magaalooyinka, taasoo muujineysa in mid ka mid ah afartii qof ee magaalo maanta deggan uu yahay barakace. Inta badan dadka soo noqday iyo qaxootiga ka yimid wadamada deriska ah ayaa sidoo kale la rumeysan yahay inay degeen magaalooyin.

**Barakacayaasha sida caadiga ah waxay u haajiraan magaalooyinka waaweyn, halkaas oo ay ka heli karaan fursado dhaqaale oo ballaaran, adeegyo kala duwan ayna isku qarin karaan.** Sannadka 2018, 20 boqolkiiba barokacayaasha Soomaaliya waxay ku nool yihiin Muqdisho, ama ku dhowaad 500,000 oo barokacayaal ah; Baydhabo waxay martigalisay in ka badan 270,000; Kismaayona qiyaastii 140,000 (Jaantus 2). Baay, Bakool, gobollada Shabeellooyinka, iyo Dooxada Jubba waxay soo mareen qax gaar ah oo aad u sarreeya oo barokac ah sababo la xiriira dagaallada soo noqnoqday, lahaanshaha dhulka ee la isku haysto, iyo abaaraha. Shanta magaalo ee ugu waaweyn Soomaaliya - Muqdisho (Benaadir), Baydhabo, Bosaaso, Hargeysa, iyo Berbera — waxay soo jiiteen ku dhowaad 40 boqolkiiba celceliska socodka barakacayaasha sannadlaha ah inta u dhexeeysay 2007 iyo 2018. Muqdisho, Baydhabo, iyo Kismaayo way ka ballaarteen magaalooyinka kale sababtaas awgeed.



Jaantus 2. Tirada Barakacayaasha Gobol ahaan (2018) (Qiyaasta Saamiga)



**Magaalooyinka Soomaaliya ayaa siyaabo kala duwan ugu fiday si ay hoy ugu noqdaan qulqulkaan.** Kuwo badan ayaa ku horumaray oo ku ballaartay fursadaha ganacsiga, sida dekedaha, xuduudaha, iyo isgoysyada wadooyiinka waaweyn. Qaar kale ayaa si xawli ah u fiday markii ay soo barakaceen dadka ka soo barakacay meelaha ku hareeraysan, ama markii nabada magaalada la adkeeyay. Magaalooyinka qaarkood waxay iska ilaaliyeen inay ku faafaan cufnaanta xarumaha magaalooyinkooda iyadoo loo marayo dhul ballaaran ama kororka dhererka dhismaha.

**Waddooyin kala duwan ee ballaarinta magaalooyinka ayaa horseedi kara natiijooyin kala duwan.** Hadba tirada dadka ee badan, ayaa waxay sababtaa inay gaabato masaafooyinka ay tahay in la kordhiyo si loo gaarsiyo kaabayaasha iyo adeegyada, iyadoo la yareynayo kharashaadka adeegga, hagaajinta marin u helidda, iyo awood u siinta dhaqaalaha miisaanka leh ee bixinta adeegga iyo wax soo saarka. Dhaqaalaha kulminaya dhinacyada badan ayaa oggol takhasus gaar ah oo ku saabsan howlaha dhaqaalaha, oo gaar u ah kordhinta wax soo saarka iyo shaqo abuurka. Sida suuqyada waaweyn ee shaqada, caasimadahu waxay sahlayaan shaqo raadinta, waxayna dedejiyaan faafinta fikradaha iyo macluumaadka. Ma jiro waddan waligiis gaadhay heer dakhli dhexdhexaad ah oo aan magaaloobin, laakiin magaalooyinku si ay u ugu rumowdo awooddooda ay ku abuuri karaan koboc dhaqaale oo loo wada dhan yahay oo waara, waxay u baahan yihiin inay adeegsadaan cufnaanta iyo isku xirnaanta si ay u soo saaraan dhaqaalahan kulminaya dhinacyada badan iyo suuqyada shaqada ee isku dhafan. Fiditaan badan, hadana kala go'an, cufnaanta hoose leh, qaabab dejin ciriiriga ayaa kor u qaadaya kharashyada kaabayaasha dhaqaalaha iyo bixinta adeegga, yareynaya cabirka suuqyada, xadidaya wax soosaarka, isla markaana abuuri kara jeebado faqri ah oo isdaba jooga ah.

**Si kastaba ha noqotee, cufnaanta magaalooyinka keligood ma dammaanad qaadayso faa'iidooyinka dhaqaalaha dhinacyada badan leh.** Dadka iyo ganacsiyada magaalada gudaheeda si fudud iskuma dhowaan karaan: waxay u baahan yihiin isku xirnaan, iyo in adeegyada loo fidiyo. Magaaleyn aan qorshaysnayn badanaa waxay keentaa degsiimooyin cufan oo dhaadheer oo ay adag tahay in jid ahaan la maro, iskaba daa in ganacsi lagu sameyn karo e: waxay la'yihiin jidad marin, wado, gaadiid dadweyne, bedqab, iyo biyo aasaasi ah iyo fayadhowr. Qorshaynta iyo kala xadaynta wadiiqooyinka jidadka ka hor dejinta ayaa ah mid ka mid ah hababka ugu muhiimsan uguna kharashka yar ee lagu taageerayo balaadhinta magaalooyinka si habsami leh oo hufan loogana hortago baahida loo qabo dib u habeyn qaali ah oo dambe. Xaqiiqdii, Soomaalidu waxay leeyihiin dhaqan weyn oo ah kala xadaynta shabakadda magaalooyinka marka loo eego dalal badan oo deris ah, laakiin tan waxaa badanaa laga tagay markii xasilloonidarradu ay ku qasabtay magaalooyinku inay si dhakhso leh u fidaan.

**Xaaladda jilicsan ee Soomaaliya, qaab muuqaalka iyo qaab-dhismeedka magaalooyinku wuxuu saameeyaa is-dhexgalka bulshada iyo sinnaanta, laakiin waxaa si weyn u saameeya loollanka bulshada iyo siyaasadda.** Magaalooyin badan ayaa qaab ahaan u qaybsan qaab qabiil; Gaalkacayo waxay dhexda ugu qaybsan tahay laba qabiil oo xarig ku joogsi leh marar badanna colaado dhex mareen, iyo laba maamul oo tartamaya. Barakacayaasha waxaa inta badan loo soocaa hareeraha magalaada, ama gebi ahaanba loo barakaciyaa dhul magaalada ka go'an. Sababta dhalisay waa mid fudud: Dhulku wuu jaban yahay badanaaana looma tartamo. Laakiin natiijooyinkaani waxay ka tarjumayaan xaaladda hoose iyo xuquuqda la siinayo barokacayaal badan waxaana laga yaabaa inay ka tarjumeyso kala sooc ula kac ah oo lagaga saarayo nolosha magaalada. Natiijadu waxay tahay in barakacayaasha ay u halgamayaan inay wax ku biiriyaan ama ka faa'iideystaan nolosha magaalada, waxayna halis ugu jiraan 'goobo nolol xun' oo muddo dheer iyo sinnaan la'aan. Saameyn kale ayaa ah fiditaan, cufnaan hoose, qaabab magaalo oo carqaladeeya wax soo saarka isla markaana keena kharashaad aad u sarreeya in la kordhiyo kaabayaasha iyo adeegyada si ay u gaaraan daafaha iyo meelaha fogfog ee magaalooyinka.


SILVER
STC


SOM
AF6141

# AWOODDA MAGAALOOYINKA SOOMAALIYEED: SOO NOOLAANSHAHA, HAL-ABUURKA, IYO KOBOCA


**Soddon sano ka hor, qaybo badan oo ka mid ah labada magaalo ee ugu waaweyn Soomaaliya - Muqdisho iyo Hargeysa – ayaa dagaaladi sokeeye ee dalka ka dhacay ka soo reebeen burbur,** sidoo kale,magaalo kasta oo kale oo Soomaaliyeed waxaa soo maray dayac sannado ah oo waxaa ku noolaa oo keliya tiro yar oo dadka deggan ah. Ka dib, magaalooyinku waxay ahaayeen abaalmarinnada ugu waaweyn ee ay ku dagaallamayaan maleeshiyooyinka, waxayna ahaayeen goobo rabshado, qax, barakac, iyo dhimasho. Maanta, magaalooyinka Soomaaliya, marka laga reebo qaarkood, waa goobo nabad waarta leh, oo ka tarjumaya mararka qaar jilicsanaan laakiin u adkeysanaya degsiimooyinka siyaasadeed ee maxalliga ah, iyo kor u kaca waaxda gaarka loo leeyahay oo saami ku leh ka ilaalinta maal-gashigooda khilaafaadka soo cusboonaaday. Muqdisho iyo Hargeysa waa kuwa si xawli ah u koraya waana goobo maalgashi aad u wanaagsan laga sameeyay ganacsiga iyo dhinaca guryaha la deggan yahay iyo dhaqaalaha adeegga. Magaalooyinka sida Bosaaso, Berbera, Gaalkacayo, iyo Baydhabo oo mar ahaan jiray magaalooyin aad u yar, aan si fiican loogu adeegin, magaalooyin fog fog xilligii dagaalka ka hor ayaa si dhakhso leh ugu soo koray oo noqday magaalooyin waaweyn oo mashquul badan.


**Magaalooyinka Soomaaliyeed maanta waa barroosinka u taagan kobaca iyo horumarka dhaqaalaha qaranka.** Waa goobaha fursadaha shaqo, ganacsi firfircoon, iyo helitaanka adeegga. In kasta oo waddanku taariikh ahaan jiray bulsho ku tiirsan miyiga, in kasta oo ay maanta xitaa dhoofinta ugu sarreysa Soomaaliya ay tahay xoolaha nool iyo dalagyada la iib geeya, haddana magaalooyinka Soomaaliya waxay soo jiitaan maalgashi waxayna furaha u yihiin horumarka muddada-dheer ee dalka iyo shaqo-abuurka.

**Magaalooyinka Soomaaliyeed waxay soo mareen soo nooleyn cajiib ah inkasta oo ay ku dhowaad labaatan sano oo burburka dowladnimo ah iyo xilligii xigay ee jilicsanaanta dowladnimada iyo maamul xadidan.** Dawlad la'aanteed, Soomaalidu waxay dhisteen nidaamyo maamul isku-dhafan, oo ku lug leh iskudhafyo khalafsan oo madax-dhaqameedyo, hogaamiyaal diimeed, kooxaha bulshada ,taliyayaasha maleeshiyada, ganacsatada, iyo mas'uuliyiinta dawlada hoose, oo bixiya heerar kala duwan oo nabadgelyo, cadaalad, maaraynta isku dhaca, nidaaminta, iyo qawaaniinta ah - in kasta oo xaqiiqada ka dhalankarta heshiisyada noocan ahi ay sababeen xasilooni darada Soomaaliya. Asal ahaan nidaamyadan isku dhafan waxay dejiyaan "qawaaniinta ciyaarta" taas oo u oggolaanaysa malaayiin reer magaal ah oo Soomaali ah inay ku raaxaystaan ugu yaraan xoogaa heer saadaalineed iyo badbaadsanaan markay ku daba jiraan noloshooda. Wadajirka sharciga ee ay muujinayaan waxay ku kala duwan yihiin qeexitaankiisa, sharci ahaanta, iyo wax ku oolnimada magaalo ilaa ka magaalo xigta, waxayna inta badan ka kooban tahay jilicsanaan, abaabul ku meel gaar ah. Inta badan maamulka magaalooyinka wuxuu ku saleysan yahay wadaxaajood halkii laga adeegsan lahaa sharciyada. Qoysaska magaalooyinka, xaafadaha, iyo meheradaha waxay soo saareen istiraatiijiyado casri ah oo loogu kuurgalo dhibaatooyinka ka jira isku-darka isku dhafan iyo mararka qaarkood maamullada maxalliga ah ee la tartamaya.

**Dhaqaalaha waaxyada gaarka loo leeyahay waxay muujiyeen adkeysigii ugu adkaa, laqabsasho, iyo xirfadaha maaraynta halista.** Ayadoo qeyb ka mid ah ay ka shidaal qaadanayso xawaaladaha adag ee ka imanaya qurbajoogta tirada badan ee Soomaalida, dhaqaaluhu wuxuu ku kobcayey qiyaastii 3.2 boqolkiiba sanadkan 2020 illaa uu cudurka COVID-19 ku dhuftey. Waaxyada gaarka loo leeyahay ayaa si gaar ah ugu xeel-dheer ka faa'iideysiga tikniyoolajiyadda cusub, sida isgaarsiinta, taasoo ku horumari karta xaalad ay kaabayaasha dhaqaalaha liitaan oo ay waheliso nidaamin sharciyeedka oo yar. Soomaaliya waxay ka soo booday inay lahayd mid ka mid ah nidaamyadii taleefannada ee ugu xumaa adduunka sannadihii 1980-meeyadii ilaa ay hada horyaal u noqotay horumarinta isgaarsiinta shirkadaha gaarka loo leeyahay ee raqiiska ah, ee la isku halleyn karo, taasoo albaabada u furtay koror isgaarsiineed iyo adeegyada bangiyeed ee mobilada loo adeegsado.

Jaantus 3: Kobaca iibka sanadlaha ah ee dhabta ahi waa mid adag, kahorreya heerarka gobolka, laakiin maadaama hubaal la'aani jirto, maalgashiga hantida maguurtada ayaa wali hooseeya




Xigasho: Xog uruurintii Bosaaso iyo Muqdisho 2019.

**Hal-abuurnimadu waxay ahayd astaamaha lagu garto ganacsiga gaarka loo leeyahay ee Soomaaliya, kaasoo kobcay inkasta oo dhibaatooyin badan oo ka dhashey fashilaadda iyo jilicsanaanta dawladda, taasoo iyadu ahayd xoogga horseedka gadaal ka riixaye xawaaraha aan caadiga ahayn ee koritaanka magaalooyinka iyo soo noolaynta.** In badan oo ka mid ah howlaha ganacsiga gaarka loo leeyahay waxay ahaayeen ganacsiga waaxda adeegga, hoteelada, iyo dhismaha. Iibka ayaa ku soo kordhayay shirkadaha magaalooyinka Muqdisho iyo Bosaaso, kuwaasoo ka wax qabad wanaagsan marka loo eego isbarbardhigayaasha gobolka, in kastoo hubaal la'aantu ay hoos





u dhigeyso maalgashiga, taas oo caqabad ku ah wax soo saarka iyo koritaanka (Jaantuska 3). Inta badan howlaha ganacsi ee ka socda Soomaaliya waxay ahaayeen kuwa sharci ah oo soo dhaweynaya ilaha shaqo abuurista iyo fal celinta suuqa, laakiin in yar, sida dhuxusha la gurto iyo dhoofinta, waa sharci darro, kuwa kalena, sida ka ganacsiga dadka, iyo tahriibinta qoryaha, ayaa si xoog leh wax u baabbi'iya. Mustaqbalka caafimaadka iyo firfircoonida magaalooyinka Soomaaliya waxay kusii xirnaan doonaan firfircoonida iyo fal celinta waaxda gaarka loo leeyahay. Tani waxay qiimo dul dhigeysaa horumarinta siyaasadaha, qorsheynta magaalooyinka, iyo awoodaha sharciyeynta ee awood u siinaya isla markaana dardargelinaya dhaqan ay mas'uuliyad ku dheehan tahay, sharci ah oo ah maalgashiga ganacsiga gaarka loo leeyahay.

**Ayadoo ay sabab u tahay awoodda dowladda ee rasmiga ah ee heer degmo, gobol, iyo heer qaran oo ahayd mid daciif oo si liidata loo maalgeliyay, waaxda gaarka loo leeyahay ayaa u istaagtay inay bixiso adeegyo, iyo sidoo kale badeecadaha kale ee dadweynaha sida amniga, kuwaas oo sida caadiga ah loo arko mas'uuliyadda dowlada.** Tani waxay badanaa ka dhacday goobaha magaalooyinka, halkaasoo ku rursanaanta awooda wax iibsigu u saamaxayo ganacsiyada fikirka leh inay rogayaan macaash iyagoo fulinaya baahiyahan aan la daboolin. Laakiin sharciyeysanka ganacsiga gaarka ah ee amniga kharashaadka agabka bulshada, waxbarashada, daryeelka caafimaadka, iyo badeecadaha kale ee dadweynaha iyo adeegyadu waxay la yimaadaan kharashyo dhab ah, oo ay kujirto dadka saboolka oo aan sinaan u lahayn dhinaca helitaanka waxyaabahan, daboolid aan sinayn, nidaam sharci la'aan. Maqnaanshaha adeegyada dowladdu bixiso, hay'adaha maxalliga ah ee aan dowliga ahayn, masaajidda, xawaaladaha, iyo barnaamijyada gargaarka caalamiga ah si buuxda uma dabooli karaan baahida loo qabo waxbarashada aasaasiga ah iyo daryeelka caafimaadka ee dadka saboolka ah.

**Waqtiga dhow, "qaabka bixinta adeegga ay bixiso xubin saddexaad" ee Soomaaliya ayaa ah oo sii ahaan doonta isha ugu firfircoon uguna jawaabta badan ee adeegyada aasaasiga ah iyo badeecadaha dadweynaha ee xarumaha magaalooyinka.** Laakiin heerarka wax ku oolka ah ee ku habboon ee nidaamyada dowladda ayaa fure u ah hubinta in bixinta adeegan dibedda ee la gaarsiinayo waaxyaha gaarka loo leeyahay ay tahay mid mas'uulnimo leh oo caddaalad ah. Qurbajoogta Soomaaliyeed, oo hadda leh kooxo tiro badan oo Soomaali ah oo leh heerar waxbarasho oo heer sare ah, tababar xirfadeed, iyo waayo-aragnimo dhinacyo kala duwan iyo waaxyo kala duwan leh, ayaa noqon kara il socota oo maal iyo khibradba leh. In kasta oo ay ku kala firidhsan yihiin adduunka oo dhan, haddana in ka badan 1.5 milyan oo qurbo-joog soomaaliyeed ah ayaa si adag ugu xidhan nuxurka nolosha magaalooyinka Soomaalida, si toos ah, ayagoo ah maalgashadayaal ganacsi iyo dhismaha guryaha, iyo si aan toos ahaynba, oo ah isha lagu qiyaasay $ 2 billion sanadkii oo ah lacagaha xawaalada laysugu diro taasoo ka caawisa inay sare u qaado baahida magaalooyinku ay u qabaan adeegyada iyo badeecada macaamiisha.

**Inta badan magaalooyinka Soomaalida waxay kufiican yihiin inay ka faa'iideystaan doorkooda dhaqaale ay la leeyihiin dekadaha kale ee u adeega suuqa Bariga Afrika iyo Suuqa Geeska Afrika ee sida xowliga ah u koraya.** Suuqyada Itoobiya iyo Kenya ayaa soo saari doona baahi weyn oo loo qabo ganacsiga soo-dejin-dhoofinta, oo magaalooyinka dekedda leh ee Soomaaliya ayaa ka faa'iideysan doona. Ganacsi soo-dejin-dhoofinta oo la ballaariyay inkasta oo Soomaaliya ay soo saari doonto dakhliga canshuuraha iyo shaqooyin muhiim ah oo laga helo dekedaha iyo qaybta gaadiidka. Waddooyinka ganacsiga ee waddanka oo dhan, haddii la ilaaliyo oo ay xaaladdoodu wanaagsan tahay, waxay noqon doonaan halbawlayaasha uu maro ganacsiga isaga goosha wadamada iyo goobaha fursadaha ganacsi ee cusub. Dhaqaalaha ganacsi ee xoogan wuxuu dhaliyaa canshuuraha laga qaado badeecada ka soo degto ama ka dhoofta dekadaha iyo garoomada dayuuradaha iyo dakhliyada noocyada kale ee canshuuraha, taas oo siineysa qaranka Soomaaliyeed ee heer kasta miisaaniyad weyn iyo awood balaaran oo lagu dhisi karo maamullo magaalooyin wax ku ool ah, ay ku bixiyaan adeegyo dheeri ah kuna abuuraan shaqooyin dhinaca qaybaha dowlada ah.

**Si kasta oo magaalooyinkii Soomaaliyeed ay u guuleysteen, hadana waxay leeyihiin awood dheeri ah oo aan weli la taaban.** In suurtagalnimadaas la gaari doono qayb weyn oo ka mid ah waxay ku xiran tahay siyaasadda guud, maamulka, iyo xulashada qorshaynta magaalooyinka ee ay mas'uuliyiinta Soomaaliyeed hadda sameeyaan. Magaalooyinka Soomaalida waxay la kulmaan caqabado waaweyn laakiin hadana waxay leeyihiin fursado waaweyn. Hadday si wanaagsan u maamuli karaan maamullada isku dhafan - ugu yaraan tallaabo ku-meel-gaar ah -, sax siyaasadaha magaalooyinka, hano doorka shirkadaha gaarka loo leeyahay ee bixinta adeegga, oo horumari jawiga sharciyeynta si loo soo jiito maal-gashadayaal badan, waxaa jira fursad weyn oo lagu gaaro horumar dheeraad ah.


EUROUK

# CAQABADAHA, HALISTA, IYO WAXYAABAHA AAN LA OGAYN EE WAJAHAYA MAGAALOOYINKA SOOMAALIYEED

**Dhammaan kartidooda, magaalooyinka Soomaaliya iyo dadka deggan iyo ganacsiyada waxay durbaba la tacaalayaan caqabado adag waxayna la kulmayaan caqabado sii kordhaya mustaqbalka.** Qaar ka mid ah caqabadahaani waxay ku lug leeyihiin hay'ado dawladeed oo burbursan. Kala aragti duwanaanta aan la xallin oo ku saabsan awooda ergada maamulka ee u dhaxeysa dowladda federaalka, dowlad goboleedyada, iyo awooda maamulka degmada ama dowladda hoose, iyo sidoo kale maqaamka Gobolka Banaadir ee la isku haysto, ayaa horseeday isku dhacyo daba dheeraaday oo dhexmara xafiisyada dowladda iyo wasaaradaha oo loolamaya. Xitaa markii ergo maamul la shaqeysiiyo, awooda fulinta howlaha aasaasiga ah ee dowladda – si loo dhaqangeliyo sharciyada, nidaaminta iyo gaarsiinta badeecada iyo adeegyada aasaasiga ah ee bulshada - aad ayey u xadidan tahay. Maamulka degmada ee loo xilsaaray ugu yaraan xoogaa awood maamuleed ah oo maareeya magaalooyinku waxay leeyihiin qaabab yar oo kaliya oo ay ku soo uruuriyaan dakhliga canshuuraha, waxayna wajahayaan iska caabin dhinaca bixinta canshuuraha maxaa yeelay waxaa loo arkaa inay wax yar ama aan adeeg u hayn shacabka. Sharci ahaanta oo hooseeysa, dakhliyada oo hooseeya, awood yarida, iyo wax soo saarka oo hooseeya ayaa midba midka kale xoojinayaa isla markaana ku tuuraa tabin dhinaca maamul xumada ah mas'uuliyiin badan oo degmooyin.


**Maamulka isku dhafan iyo nidaamka wadajirka ah ee sharciga ah ee ay ka kooban tahay ayaa ah habab wax ku ool ah oo lagula tacaalo magaalooyinka Soomaalida oo aan si dhaqso ah lagu beddeli karin, laakiin waxay abuurayaan heerar aad u sarreeya oo qallafsan iyo hubaal la'aan, taas oo niyad jab ku ah maalgashadayaal badan oo gaar loo leeyahay.** Kuwa ugu awooda badan ee ku howlan waaxda gaarka loo leeyahay ayaa laga yaabaa inay ku kobcaan xaaladahan, sababtoo ah waxay leeyihiin dhaqaale iyo awood ay si guul leh ugula gorgortamaan uguna bixiyaan natiijooyinka la doorbido, laakiin maalgashadayaasha yaryar iyo kuwa heerka dhexe ayaa aad ugu nugul.

**Meelna uma muuqato inay caddaalad darradan uga badan tahay magaalooyinka Soomaalida dhibaatooyinka muddada dheer socday ee dhinaca lahaanshaha dhulka, bixinta shatiga lahaanshaha, iyo maaraynta khilaafaadka.** Lahaanshaha dhulka aan sugnayn iyo shati bixinta la isku haysto ayaa ka dhigaysa iibsiga iyo dayactirka lahaanshaha hantida maguurtada ah ee qiimaha badan dadaal walaac leh, oo waddada maalgashiga ku tuuraya jid gooyo. Mas'uuliyiinta sharciga ah ee u xilsaaran maaraynta khilaafaadka dhulka waxaa ka mid ah isku dhafka nidaamka garsoorka dowladda oo aan deganayn, mas'uuliyiinta qabaa'ilka, iyo mas'uuliyiinta diinta. Dhulka magaalooyinka waa mid aad loo qiimeeyo waana isha ay ka dhashaan xiisadaha shaqsiyadeed iyo kuwa beeleed, taas oo ay uga sii dartay khilaafaadka taagan ee soddon sano jirsaday ee ku saabsan boobka dhulalka ee dhacay intii lagu jiray dagaalkii sokeeye. In yar oo ka mid ah magaalooyinka Soomaaliya ayaa si guul leh u maareeyey caqabadan, badankooduna waxay u muuqdaan kuwo doorbidaya inay ka fogaadaan la macaamilka mawduucan xasaasiga ah.

**Amni darrida ayaa ah caqabad kale oo weyn oo haysata magaalooyinka Soomaaliya.** Qeybta amniga ee rasmiga ah ayaa wali daciif ah. Hawlo dabacsan oo ka imanaya qabanqaabooyinka maamul isku-dhafan, ka-hor-tagga qabiilka ku saleysan, iyo adeegyada amniga ee gaarka loo leeyahay ayaa dadka qaar nabadgeliya siiya, laakiin waxay ka gaabiyeen inay ka badbaadiyaan masaakiinta iyo deegaanka kooxaha dadka la hayb-sooco iyo kuwa tirada yar. Qiimaha amniga gaarka ahi wuxuu culeys ku yahay ganacsiyada iyo qoysaska. Lacagta ilaalinta ee la siiyo Al Shabaab iyo maleeshiyo beeleedka maxalliga ah, oo loo sawiray inay yihiin "canshuuro," waxay ka dhigan tahay nooc baad lacageed ah oo ay dad yar oo reer magaalka ah kaliya ka badbaadi karaan. Weerarada argagaxisada ee adag ee Al Shabaab ku qaado hudheelada, maqaayadaha, iyo meheradaha kale ayaa khatar kale ku ah xarumaha magaalooyinka, gaar ahaan Muqdisho. Ugu dambeyntiina, halista dil qaarajis ah ee ay geystaan Al Shabaab, ganacsatada ayagu xafiiltama ama qabiil ay is hayaan sababo la xiriira cabashooyin muddo dheer soo jiitamayay ayaa ah cabsi soo foodsaartay dadka deegaanka. Magaalooyinka ku yaal koonfurta Soomaaliya ee martigaliya ciidamada ilaalinta nabadgeliyada ee AMISOM, hoos u dhaca la filayo inuu ku yimaado ciidamadaas wuxuu ku sii kordhinayaa dhinaca qaybaha amniga hubaal la'aan dheeri ah

**Magaaleyn xowli ah waxay noqon kartaa duco ama habaar; Waxay kuxirantahay gabi ahaanba xoogga iyo diirad saarka qorshaynta magaalooyinka.** Laakiin maqnaanshaha xog la isku halleyn karo (ama mid kasta) oo ku saabsan tirakoobka bulshada iyo dhaqan-dhaqaalaha, kala caddeyn la'aanta xuduudaha xarumaha magaalooyinka - ama xitaa waxa ka dhigan magaalo - ayaa dhibaato ku ah qorsheynta iyo bixinta adeegga ee Soomaaliya. Waqtigan xaadirka ah, inta badan magaalooyinka Soomaalida ayaan lahayn qorsheyaal wax ku ool ah oo loogu talagalay horumarinta xaafadaha cusub oo leh kaabeyaal dhaqaale oo habboon. Natiijooyinku waxay noqdeen xaafadaha isku-raranta oo ku sii fidaya daafaha magaalooyinka waaweyn (fiiri sawirka 4).

Jaantus 4. Degsiimooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay waxay ku yaalliin daafaha Magaalooyinka







Source: UN-Habitat 2017

**Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee horyaala magaalooyinka Soomaaliya ayaa ah barokacayaasha tirada badan ee magaalooyinka waaweyn ay martigeliyaan.** Barakacayaasha waxay keeneen laba caqabadood. Midda hore waa ballaadhinta cabirka iyo tirada "xeryaha" barakacayaasha ee ay degeen barokacayaashu. Kuwani mararka qaar waxay ku yaalliin bartamaha magaalooyinka, laakiin iyadoo si xawli ah kor ugu kacaysa qiimaha guryaha in badan oo ka mid ah barakacayaasha ku jira xeryahaas ayaa si qasab ah loogu barakiciyay xerooyin cusub oo ku yaal hareeraha magaalooyinka, kana fog adeegyada aasaasiga ah iyo gaadiidka dadweynaha ee ku filan. Midda labaad ayaa ah su'aasha ah aqoonsiga iyo xuquuqda muwaadinnimo ee barakacayaasha ku nool magaalooyinkan. Muhaajiriinta Soomaaliyeed ee magaalooyinka ku nool waxaa caadi ahaan loo qoondeeyay inay yihiin barakacayaal markay sabool yihiin oo ay gobol kale ka yimaadaan. Erayga wuxuuxambaarsan yahay xamuul dheeri sidaa darteed: Waxay ka turjumaysaa in barakacayaasha ay yihiin dad marti ah, oo leh xuquuq xadidan, waxaana macquul ah inay si ku meel gaar ah ugu jiraan xeryaha ilaa ay uga noqonayaan gobolkoodii "guryahoodii". Xaqiiqdu waxay tahay in barakicinta gudaha badankeeda ay tahay mid joogto ah, isla markaana barakacayaasha ay u baahan yihiin xuquuq muwaadinnimo oo buuxda iyadoo aan loo eegin qabiilkooda ama gobolkiisa ama halka uu ka soo jeedo. Joogitaanka barakacayaasha waxay keeneysaa su'aal aasaasi ah oo ku saabsan yaa xaq u leh inuu ku noolaado magaalooyinka Soomaalida

**Dhaxalka dagaalka sokeeye ee waara ee qeybinta qabiilka wuxuu ka muuqdaa magaalooyinka Soomaaliya qaab is-takoorid heer xaafadeed ama degmo.** Ayadoo laysugu soo wada duubayo qaab aqoonsi abtirsi ahaaneed waa mid ka mid ah siyaabaha wax ku oolka ah ee qoysasku u hubiyaan nabadgelyada naftooda, maadaama ay isku halleyn karaan dadka reeraha ah ee isku qabiilka ah inay iska ilaaliyaan khataraha dibadda. Laakiin kala-soocidda qaab-qabiil ah waxay khatar gelinaysaa kalsooni-darrada sii badaneysa ee qabaa'ilka kale, waxayna ka dhigaysaa isu-socodka dadka iyo badeecadaha magaalada oo dhan mid khatar ah oo qaali ah, waxayna xaddidaysaa maal-gashiga ganacsiga iyo marin uhelida suuqyada. Inta badan magaalooyinka Soomaalida waxay leeyihiin ugu yaraan xaafado isku dhafan, laakiin qaababka isdaba-joogga ah ee is-takooridda qabiilka ayaa caqabad ku noqon kara horumarka.

**Inta ay muhaajiriintu ku soo qulqulayaan magaalooyinka Soomaaliya, caqabadda abuurista shaqooyin cusub ayaa sii ahaan doonta mudnaanta koowaad.** Shaqo la'aanta ka jirta magaalooyinka Soomaalida ayaa durba sareysa oo waxay u egtahay inay kasii dari doonto hadaan la daba galin isku darka saxda ah ee siyaasada guud iyo maalgashiga. Marka la fiiriyo miisaaniyadaha yar ee dowladda Soomaaliya, waaxda gaarka loo leeyahay ayaa sii wadi doonta inay noqoto isha ugu weyn ee shaqo abuurka muddada dhow iyo muddada dhexe. Qaybaha gaarka loo leeyahay waxay ubaahan doonaan in kabadan oo kaliya jawi awood u siiya inay balaariyaan; waxay sidoo kale ubaahan doontaa xoog shaqaale sifiican u tababaran oo buuxiya shaqooyin cusub. Qeybta shaqada ee rasmiga ah waa inay sidoo kale haweenka u balaariyaan fursadaha, kuwaas oo hada aan sifiican uga dhex muuqan dhaqaalaha rasmiga ah taa badalkeedana ku badan dhaqaalaha aan rasmiga aheyn.

**Ugu dambeyntiina, magaalooyinka Soomaaliya waxay la kulmaan caqabado waawayn oo ah joogtaynta-bii'ada iyo dhaqaalaha.** Xakamaynta liidata ee doorka waaxda gaarka loo leeyahay ee bixinta amniga gaarka ah, waxbarashada, daryeelka caafimaadka, dawooyinka, korontada, biyaha, iyo adeegyo kaleba ayaa halis weyn ku abuurtay macaamiisha magaalooyinka. Dhibaatada ugu horeysa ee haysata waaritaanka waa mid deegaan waxaana durba laga dareemayaa Kismaayo ilaa Hargeysa. Korodhka degdega ah ee baahida loo qabo biyaha ee magaalooyinka ayaa ciriiri gelineysa qaar ka mid ah ilaha biyaha la dhaamin karo iyo nidaamyada gaarsiinta, iyo kororka laba-geesoodka ah ee dadka ku nool magaalooyinka iyo hantida sii kordheysa ayaa keeneysa baahiyo dheeri ah oo sahayda biyaha ah. Caqabadda labaad ee saameysa waaritaanka waa mid dhaqaale. Magaalooyinka Soomaalida waxay cunaan in kabadan inta ay soo saaraan, dhaqaale shidaal ka qaata qulqulka badan ee xawaaladaha ka imaanaya dibadda sannad walba. Saadaasha muddada dheer ee xawaaladaha qurbaha lama yaqaan, laakiin waxaa walaac laga muujiyay in jiilka koowaad ee Soomaalida qurbo-joogga ah ay gaboobayaan, in carruurtooda iyo carruurta ay sii dhaleen ay aad ugu faraxsanayn xawilaadda lacagaha qaraabada fog. Isla mar ahaantaana, hadda aad ayey ugu sii adag tahay Soomaalida dib u dajinta u joogo waddammada saddexaad marka loo eego 1990-yadii, taasoo la micno ah in Soomaaliya aysan awoodin inay si fudud ku buuxiso darajooyinka qurba-joogga ay ka go'an tahay inay lacag u diraan qoysaskooda. Hadday taasi dhici lahayd, reer magaalka Soomaaliyeed waxay si tartiib tartiib ah u arki lahaayeen hoos u dhaca awooddooda wax iibsi.



# TALOOYIN MUHIIM AH

**Magaalooyinka waa barroosinada Somalia ee ugu awoodda badan uguna rajada badan dhinaca horumarka mustaqbalka.** Istaraatijiyadaha horumarinta qaranka iyo kaalmada horumarinta caalamiga ah waa inay diiradda saaraan abuurista jawi u suurta gelinaya magaalooyinka Soomaaliyeed inay gaaraan awooddooda ugu sarreysa ee ah horseedka kobaca waara oo dhinacyo badan leh, siinta muwaadiniinta fursado dhaqaale oo kala duwan, kobcinta hal-abuurnimada, iyo sare u qaadista helitaanka adeegyo bulsho oo tayo leh, dhammaantoodna taageero ka helayaan maamul xasilloon oo lala xisaabtami karo.Talooyinka mudnaanta sare leh ayaa hoos ku taxan.

### Maamulka Magaalooyinka

| ARRIMAHA MUHIMKA AH | TALOOYINKA | | MASUULIYADA |
|---|---|---|---|
| MAAMUL DOWLAD HOOSE OO LA ISKU HAYSTO, KALA DAADSAN, OO AAN WAXTAR LAHAYN | | • Si cad ukala sooc mas'uuliyadaha u dhexeeya qaran, gobol, iyo degmo ama maamulka dowladaha hoose, oo ay ku jiraan qabanqaabada maalgelinta | **Hogaaminaya:** DFS, Wasaaradda Maaliyadda Wasaaradda Arrimaha Gudaha<br><br>**Weheliyaan:** Dowladaha Degmooyinka iyo Beesha Caalamka. |
| | Muddo gaaban | • In la sameeyo istaraatiijiyado lagu dejiyo xeerar aasaasi u ah iskaashi lala yeesho nidaamyada siyaasadeed ee isku dhafan.<br><br>• Xooji kalsoonida lagu qabo dawlada degmada iyadoo la adeegsanayo adeegyo dibada ah iyadoo la adeegsanayo wareejinta maaliyadeed ee dawladaha dhexdeeda halkii laga kordhin lahaa cashuurta. Dawladaha degmooyiinka waxay u baahan yihiin inay marka hore ka kasbadaan dadka deegaanka iyo ganacsatada heer ilaa xad loo arko sharci inay yihiin iyagoo u siinaya adeegyo si la isku halleyn karo, markaasoo kordhinta dakhliga canshuuraha la kulmi doonto iska caabin yar.<br><br>• Kordhi xirfada aasaasiga ah ee maamulada degmooyiinka ee dhinaca maaraynta miisaaniyadda, qorsheynta, dabagalka, iyo kormeerka. | **Hogaaminaya:** DFS, Wasaaradda Maaliyadda Wasaaradda Arrimaha Gudaha<br><br>**Weheliyaan:** Dowladaha Degmooyinka iyo Beesha Caalamka. |

## Bixinta Adeegga

| ARRIMAHA MUHIMKA AH | TALOOYINKA | | MASUULIYADA |
|---|---|---|---|
| NATIIJADA BIXINTA ADEEGGA OO LIIDATA OO AAN SINNAYN IYO NIDAAM LA'AAN.<br><br>LA'AANTA QABANQAABO WAX KU OOL AH OO DHEXMARTA HOWL WADEENADA DOWLADA IYO KUWA GAARKA LOO LEEYAHAY | Tallaabooyin degdeg ah | • Aqoonso in hadda, in yar oo adeegyada bulshada ah ay bixiyaan hay'adaha dowliga ah; adeegyada badankood waxaa bixiya shirkadaha gaarka loo leeyahay ama NGO-yada<br>• In diirada la saaro bixinta adeeg ay bixiyaan xubin saddexaad oo fursad u ah magaalooyinka Soomaaliya inay ka gudbaan nidaamka bixinta adeegga ee ay dowladdu hoggaamineyso oo u baahan kaabayaal qaali ah iyo dhisme tayo aqooneed ah oo qotodheer. | **Hogaaminaya:** Dowladaha Degmooyinka<br><br>**Weheliyaan:** bulshada, bixiyeyaasha adeeggaiyo Beesha Caalamka. |
| | Mudada gaaban | • Samee jawi nidaam sharciyeyn ah oo loogu hago bixinta adeegga ay bixiso xubin saddexaad. Tani waxay u baahan doontaa in la xisaabiyo sharciyada hadda jira ee xukuma waaxda gaarka loo leeyahay iyo horumarkooda kororka ah, la-tashiga bixiyeyaasha si loo hubiyo aqbalaadooda, iyo in bulshada lagu tababaro xuquuqdooda macaamiil ahaan.<br>• Diirada saar bixinta adeegyada bulshada ee shirkadaha gaarka loo leeyahay aysan si iskood ah u maalgashan doonin. Adeegyadan waxaa ka mid ah maareynta qashinka adag, dhismaha / dayactirka waddooyinka, maareynta daadadka, iyo diiwaangelinta muhiimka ah (sida shahaadooyinka dhalashada). | |

## Macluumaadka Magaalada iyo Falanqaynta

| ARRIMAHA MUHIMKA AH | TALOOYINKA | MASUULIYADA |
|---|---|---|
| LA'AANTA XOG SAX AH OO KU SAABSAN MAGAALOOYINKA SOOMAALIYA | • Samee hanaan maaliyadeed si had iyo jeer loo soo saaro xog iyo cilmi baaris ku saabsan magaalooyinka Soomaaliya sida badeecadaha dadweynaha.<br>• Horumarinta siyaasadda iyo wax ka qabadka ku aadan horumarinta magaalooyinka Soomaaliyeed waxay u baahan yihiin inay wax badan ku saleysnaato caddeyn iyo aqoon wanaagsan. | **Hogaaminaya:** Dowlad goboleedyada, Xafiiska Tirakoobka Qaranka<br><br>**Weheliyaan:** Beesha caalamka |

## Maamulka Dhulka

| ARRIMAHA MUHIMKA AH | TALOOYINKA | | MASUULIYADA |
|---|---|---|---|
| WARQADAHA AQOONSIGA LAHAANSHAHA DHULKA EE AAN CADDAYN WAXAY HORSEED U YIHIIN BOOBKA DHULKA, MACLUUMAADKA MALA AWAALKA KU SAABSAN DHULKA MAGAALOOYINKA, IYO AAGAG AAN QORSHEYSNEYN OO AAN SI FIICAN U HELIN ADEEG OO KU FIDA DAAFAHA MAGAALOOYINKA TAASOO MUUJINEYSA SARE U KICISTA SABOOLNIMADA. | Tallaabooyin degdeg ah | • Sug xaaladda barakacayaasha ayadoo xoogaa rasmi ka dhigayo degsiimooyinka aan rasmiga ahayn. Xalku wuxuu noqon doonaa mid ku tiirsan kiiska, laakiin waxaa ka mid noqon kara rasmiyeynta deganaanshaha, kaalmada kirada, deeqaha cusboneynta guryaha, heshiisyada ijaarka bulshada iyo horumarinta guryaha bulshada ee ay hogaaminayaan waaxda shirkadaha gaarka loo leeyahay. | **Hogaaminaya:** Dowlad goboleedyada, Gudiga dhulka, MoPW, MoPIED waaxda Xalalka Waara, waaxda xalalka waara ee dowladda degmada<br><br>**Weheliyaan:** Howl wadeenada aan dawliga ahayn iyo beesha caalamka. |
| | Mudada gaaban | • La joojiyo dhulalka sida sharci darada ah loo boobayo ee ay ku kacaan howl wadeenada aan dowliga aheyn iyadoo la dejinayo hanaan si sharci ah loogala wareego dhulka danta guud isla markaana la siiyo magdhow cadaalad ah dadka ay saameysay.<br><br>• Soo saar difaacyo kahortaga dhaqamada mala awaalka ah, tusaale ahaan soo celinta dhulka loo qoondeeyay hadii aysan ku horumarinin waqti go'an, ama mala awaal ku saabsan canshuuro. | **Hogaaminaya:** Dowlad goboleedyada Gudiga dhulka, Wasaaradda Howlaha Guud,<br><br>**Wasaaradda** Qorsheynta, Unuga Xalalka Waara, Weheliyaan: Howl wadeenada aan dawliga ahayn iyo beesha caalamka. |

## Horumarka Dhaqaalaha

| ARRIMAHA MUHIMKA AH | TALOOYINKA | | MASUULIYADA |
|---|---|---|---|
| SHAQO LA'AAN BADAN, GAAR AHAAN DHALINYARADA | Tallaabooyin degdeg ah | • Iska ilaali inaad si xad dhaaf ah u maamusho dhaqaalaha aan rasmiga ahayn, taasoo wiiqi karta ilaha dhaqaale ee muhiimka u ah dadka saboolka ah.<br>• Muuji heerarka ugu hooseya ee sharciyeynta ganacsiyada aan rasmiga ahayn, sida hubinta in farmasiyada ay kaliya iibiyaan dawooyinka la oggol yahay, ayagoo maalgashanaya kaabayaasha ilaaliya inay marin u helaan macaamiisha, sida ku rakibidda saldhigyada iibka nadaafadda ee boosteejooyinka basaska dadweynaha.<br>• Abuur shaqooyin si wax looga qabto dib-u-dhaca dhaqaalaha kadib-COVID-19 adoo ka faa'iideysanaya mashaariicda dhismaha, oo labadaba shaqaalaysiiya shaqsiyaad leh xirfado xaddidan isla mar ahaantaana hagaajiya jawiga ganacsiga | **Hogaaminaya:** Dowlad goboleedyada, Wasaaradda Qorsheynta, Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada<br><br>**Weheliyaan:** Maamulada degmooyiinka, shirkadaha waaxyada gaarka loo leeyahay, Ururada bulshada rayidka, beesha caalamka |
| | Mudada gaaban | • La shaqee shirkadaha gaarka loo leeyahay si loo dejiyo siyaasado abuuraya fursado shaqo oo badan (gaar ahaan qeybta adeegyada), iyo in si weyn loo maalgeliyo tababar xirfadeed iyo waxbarasho – oo la horumariyo iyadoo lala kaashanayo shirkadaha gaarka loo leeyahay - si loo hubiyo in dadka shaqo doonka ah ee Soomaaliyeed ay leeyihiin xirfadaha looga baahan yahay inay buuxiyaan.<br>• Horumari jawiga ganacsiga iyadoo loo marayo dib-u-habeyn siyaado ah, gaar ahaan kuwa ku saabsan amniga, helitaankamaalgelin, qawaaniinta nidaaminta waaxda, iyo dhexdhexaadinta maaliyadeed.<br>• Dib u habee oo balaari kaabayaasha dhaqaalaha ee dekedaha, taas oo ah isha ugu weyn ee fursadaha dhaqaale ee waaxda laga ganacsan karo ee Soomaaliya | **Hogaaminaya:** Dowlad goboleedyada, Wasaaradda Qorsheynta, Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada<br><br>**Weheliyaan:**Maamulada degmooyiinka, shirkadaha waaxyada gaarka loo leeyahay, Ururada bulshada rayidka, Beesha caalamka |

Layout/graphic design by Carlos Plaza Design Studio.

THE WORLD BANK
IBRD • IDA | WORLD BANK GROUP